# Golaha Wakiilada JSl

*Minuteska*

## Fadhigii Golaha ee Xogwaraysiga Wasiirka Wasaarada Maaliyada.

**31/10/2010**

Fadhigan oo uu Gudoominayay G-xigeenka ahna ku simaha Gudoomiyaha Golaha wakiiladaMd. **Md**. **C/casiis Maxamed Samaale** ka dib furitaan wuxuu iclaamiyay in manta uu Wasiirka Maaliyadu **Md. Maxamed Xaashi Cilmi** uu fadhiga ugu martiyahay si Goluhu su'aalo uga waydiiyo Hawsha uu Qaranka u hayo ee Wasaarada Maaliyad. Gaar ahaan, wax uga waydiiyaan.

- Mushaharka shaqaalaha iyo ciidama Loo kordhinayo
- Cashuuraha iyo dakhliga dawlada
- Iyo Guud ahaanba Miisaaniyada 2011 ee soo socota iyo su'aalo kale.

Gudoomiyuhu Ka dib wuxuu ku wareejiyay wasiirka Maaliyada oo sheegayugu horayn inay qiimayn ku sameeyeen si loo'eego Mushaharka shaqaalaha iyo ciidamada, oo ay u saareen ilaa 4 Guddi oo qiimayn ku soo samaysa inta uu ku noolaankaro qoys dhexdhexaad ah, taasna ay ka soo talo bixiyeen qiimayn isku dhowdhow oo ilaa ah $250 ilaa $300 sidaa darted ay taa ka duulidoonaan.

Waxaa kaloo Wasiirku sheegay in diiwaangalintii cashuuraha Guryaha ka sameeyeen Hargeysra taas oo ay ugu talagaleen in dakhliga cashuuraha Bariga la kordhiyo oo iminka 8% ah loona baahanyahay inay aad ugu badanaato.

Waxaa kale oo uu wasiirku xusay inay talada shaqaalaha ay u soo jeediyeen wixii shaqaale dheeraada ee aan shaqayn in Hay'ada shaqaalaha tababar looga furo inta waawayna ay iska fadhiistaan iyagoo aan laga jarayn inta yar ay iminka qaataan inta patient looga samaynayo.

Ugu danbaytiina wuxuu wasiirku tilmaamay in misaaniyada samaynteedu ay noqon doonin mid qarsoon ee laga wada qayb qaadan doono. Sidoo kale ay jirto dollarkii oo dhacay iyo maciishadii oo kor u kacday taasna ay wax ka qaban doonaan xilna ka wada saaran yahay ilaa xildhibaanada.

**Su'aalaha ay Mudanayaashu waydiiyeen Wasiirka Maaliyada iyo jawaabahooda.**

### 1. Xill. C/raxmaan Cisman Caalin

**S**u'aal 1.Caaglaha sidee loo kantorolayaa maxaase wasaarad ahaan ugu talagasheen?
2. Ascaartii way korodhay, taana maxaa wasaarada uga yaal?

**J**awaab**.** 1. tan caaglaha shaqaalaha dawlada waxaan samaynay 3 form A,B, iyo C formka C ee danbe madax tirsi bay ahayd inta shaqada qabata ee joogta,

ciidamadana rag khibrad u leh baan u saarnay oo waan sugi.

2. Tan ascaartana sababteed xil baa inaga wada saaran oo in meel lagu xidho dollarka sarifkiisa baa loo baahanyahay, sideedaba xilligan dhici jirtay ilaa ciida arafo.

**3. Xill. C/qaadir Jirde aw Cali.**

**S**u'aal**:-** 1.Maxaad Guddiyada Golaha uga qayb galin wayday arrimaha aad wadaan ee khuseeya?
2. Markii dollarku dhacay waxaa la yiri waxaad samaysay Account dahashiila oo aad dollarka ku uruurinaysaan sida jaraa'idku qoray taana maxaa ka jira?

**j**awaab**:-** 1. Tan Guddiyada maan ogayn waxaana jecelahay inay nagu soo biiraan miisaaniyadana cidaad noo soo dirtaan waxbaan wada samayanaynaa.
2. Accountka Dahabshiilna ma jiro kayga oo aan hore u lahaa mooyee maan Furin mid cusub.

**4. Xill. Axmed Kijaandhe:**

**S**u'aal**:-** 1. Cashuurta dakada aad baa loo kordhiyay baa la yidhi oo waxaa laga cawday cashuurk korodh maxaa ka jira?

**j**awaab**:-**1.Chamber of commercega waan la shirnay si loo helo wixii cashuur dheeraad laga qaado, oo waxaad arkaysaa shay kaliya oo cashuuro kala duwan laga qaaday, silliga oo kale meel waxaa ku qoran in la miisaamo oo lagu cashuuro meelna wax kale markaa cashuurtaa waxbaan ka qabanaynaa.

**5. Xill. Maxamed Jaamac Cabdi**

**S**u'aal**:-** 1. Waxaa jira cashuur aan sharci ahayn oo la qaadi jiray sida cashuurtii aafada burco ma qaadaan wali?
2. 2% bariga isna ka waran mar waxaan ogaa iyadoo la hayo side wax ugu qabanaysaa.?

**j**awaab:**-**1.Cashuur aan sharci ahayn oo aanu Goluhu ansixin ma qaado, tii burco meel ay ku qorantahay maan arag waan eegi si loo galay.
2. Tan 2% barigana qoraal baan waayay. Waxaa ii yimi maayar ka laascaanood oo iyidhi keen 2% waxbaan ku qabanaynaaye oo Suuqa khudaarta iyo hawlo kale ayaan ku fulinaynaaye taana waan ku farxoo wixii xagaa loo qaado waa la qaybsan jiray waxba laguma qaban jirin.

**6. Xill. Xuseen Ismaciil Yuusuf.**

**S**u'aal;- 1. Sicirkan kacay hadii aan la helin central bank, banking system wanaagsan leh waxba laga qaban karimaayo markaa ma idiin qorshaysantahay?
2. Daynta waxay ahayd wax soo taxnaa oo wasiirba wasiir u gudbiyay markaa baadhistan aad wadaa maxay daarantahay ma nin ceebays baad wadaan?

**J**awaab**:-** 1. Baankeena qabyo badan baa ka jirta oo waan samaynaynaa waana ka wada soconaa cida ku shaqada leh.
2. Tan dayntu dhiidhibay ila galaysaa iyadu………Masuuliyiin Qaran baynu nahay waynuna dhaaranay, markaa maah inaan Gobolo iyo reernimo wax ku difaacno ee sharci wax aan ku difaacno.

## 7. Xill. Jaamac Xasan Aadan

**S**u'aal:- 1. Shidaalku wuu ka xidhanyahay Barbara markaa maxaa loo diidanyahay in ganacsatada shidaalka kala soo dagaan?

**J**awaab**:-** 1. waad ogayd oo waatii itoobiya kontrobaan inooga yimi, ana wasaarad ahaan nama khusayso, ee wasaarada Ganacsiga ayay khusasaa anaga waxaa naga khusaysa waxyar sida lacagta iyo tayactirka oo kale lacagtii lagu lahaa dhowaan ayaan heli, dawladuna warqad ha u qorto TOTAl oo ha la waydiiyo inay suuqa ku
jiraan iyo inka le markaas ayaan go'aan gaadhi.

## 8. Xill. Ibrahim Axmed Raygal

**S**u'aal**:-** 1. Bebera mooyee dekada kale ma jiraan?
2. Xaga bada wax dakhliyi ma idinka soo galaan?
3. lacagta ma laga badalayaa burco oo qorshaha ma idiinku jirtaa?

**J**awaab**:-**1. Dakade kale waynu leenahay waxaadse ogaataa maamulku ma wada Gaadhin dalka.
2. badaheen waa la xaalufiyay, oo xataa meelihii ugu kaluunka badnaa iminka waxba loogu tagimaayo. Sidaa darteed anigu waxaanba soo jeedin lahaa maraakiibta Ruqsada la siinayo aan joojino.
3. lacag ka badalida burco iyada sheeg sheegimayno oo waxaa ka baqaynaa inay lacago badan lagu soo daabulo

## 9. Xill. Siciid Maxamed Cilmi

**S**u'aal**:-.** 1. Mushaharka shaqaalaha waad ka hadashay meelna maad dhigin tiro Go'an mad sheegin oo aad kordhinaysid misaniyada 2011 markaa cadee maxaad kordhinaysaa?
2. Balanqaadkaagii warbixintii saddexda bilood waa la gaadhay wakhtigii, Meeday iyana?
3. Su'aashii hore laguu waydiiyay ee ahayd denmarka noo cadee waxay idin siisay markale?

**J**awaab:- 1.Arrinta shaqaalaha aan isla eegno waxaan kordhin karo, Qandaraaska Shidaalka iyo Raashinka ciidamada waxaan bixinaa lacag badan oo tan dadka way ka qaalisantahay markaa qandaraas inaan ku bixino

ayaan doonaynaa.
2. saddexbiloodkii waan samaynaynaa oo iminkaan wadnaa. Waana soo bandhigi.

**10. Xill. C/qaadir Jaamac Xaamud**

**S**u'aal:- 1. Xaga waxbarashada iyo dhinac sanaag barri may u taal 2% keedii ay lahaayeen?
**j**awaab**:-**1. 2% Barriga Sanaag waan baadhi oo xog rasmiya wali kamahayno.

**11. Xill. Maxamed Cali Xirsi.**

**S**u'aal**:-**1.Golaha ma u sheegi kartaa billaha Aug, Sept, iyo Octo dakhligaad qabateen?
2.Hanti-dhawraha qaranka ayaa sidaan ku arkay jaraa'idka ku qornayd waxaan galinaynaa baayac-mushatarka ma xeer baad adeegsatay?
3.Miisaaniyadu sharciyan waa halmar sanadkiiba, markaa miisaaniyada 3 sano maxay tahay ma sharcigibaad jabinaysaa?

**J**awaab**:-**1.Dakhliga bilahaasi waa 95 bilyan S/l sh/=
2.Anigu maan odhan hantidhowr baan galinayaa baayac mushtar waxna kama jiraan. ee internal Audit baa loo dirayaa baan idhi.
3.Misaaniyada sanadlaha ahayd waa sideedii tan sadexda sano waxaan u samaynaya waxaa naga codsaday deeqbixiyayaasha si ay u ogaadaan waxay inaga caawiyikaraan.

**Cawad Cali Maxamed**
**Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka Golaha Wakiilada**
**-------------------------------------------------------------------**

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSl**
**-----------------------------------------------------**